



Booqashadii Prof, Dalxa ee Michigan

Waxa si fiican loogu soo dhaweeyey gobolka Michigan Prof. Maxamed Cumar Dalxa oo ah Gudoomiye ku xigeenka Koowaad ee Baarlamaanka Soomaaliya oo dhawaan ku marayey socdaal Waqooyiga America. Prof. Maxamed Cumar Dalxa oo ay la socdeen wafti kala yimid Minnesota oo kala ahaa Abdirisaq Dirir (duceysane), Abdiraxman Sheekh Xasan (timodheere), Dr. Maxamuud Qaali Gacmey, iyo Abdimalik Askar.

Imaatinka Prof. Dalxa ee gobolka Michigan ayaa ka dambeysey markii uu casuumad ka helay ururka Somali American United Council of Michigan oo ay u wada dhamaayeen madaxdii ururka, Hussen Hussen Chairman, Abdirizaq Geyre Vice Chairman, Abdiraul Mohamed Secretary, Abdirashiid Geyre Public Relation, Abdisacid Warsame Youth Supporter iyo Soomalida degan

Ururka SAUCM ayaa waxa ay ugu tala galeen Prof. Dalxa xaflad heer sare ah oo isugu jirtay casho iyo xogwaran, waxana ay ka dhacdey hotelka weyn ee

Baymont ee magaalada Ann Arbo City. Halkaas oo ay isugu yimaadeen Soomaalida degan gobalka Michigan iyo gobolada kale ee ku dhowdhow.

Xafladan ayaa ku saleysneed mid cilmiyeysan oo ereyadeedana ke dhex muuqdeen aqoon dhab ah. Halkaas oo lagu lafa gurey baahida dowlada iyo sidii loogu soo wada dabaali lahaa Soomaaliya nabad waarta.



Abdiraxman Timoos iyo Prof. Dalxa



Contact Information
Somali Media
Abdimalik Askar
Aabdimalik@hotmail.com